

Talaalka Johnson & Johnson COVID-19: Waxa Ay Tahay Inaad Ogaato

QORAALKA

[muusik qafiif ah]

[Warin]

Talaalka Johnson & Johnson COVID-19: Waxa Ay Tahay Inaad Ogaato

Xarumaha Xakameynta iyo Ka hortaga Cudurada (CDC, Centers for Disease Control and Prevention) ayaa hadda ku talinaysa in la qaato talaallada COVID-19 (Pfizer iyo Moderna) halkii laga qaadan lahaa talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson.

Maxaa loo badalay talooyinka?

Khubarada ayaa aqoonsatay in cilada dhifka ah ee ka dhalatay kadib markii dadku qaateen talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson ay keentay dhimashada dhawr qof. Inkastoo ciladaani tahay mid dhif ah, haddana waa mid aad u daran, waxaana jira talaallo kale oo la heli karo oon lahayn isla khatartaas. Khubarada ayaa wax ka badalay talooyinka kadib markay dib u eegeen cilmi baarista hadda ee ku aadan waxtarka Johnson & Johnson, iyo badqabkiisa. Waxay sii wadaan inay dib u eegis ku sameeyaan dhammaan talaallada si loo hubiyo badqabkooda iyo haddii loo baahdo, wax looga badalo talooyinkooda ku aadan cilmi baaristaas. Qaybo kasta oon la aqoon ama lama filaan ah oo ciladaha xunxun ee talaalka ka dhalan kara ah ayaa la hubiyaa kadibna xal loo raadshaa, dadkana waa looga digaa.

Ka waran haddaan mar horaba qaatay talaalka Johnson & Johnson?

Uma badna inaad wali qaato cilada dhifka ah ee dhiig xiranka ka dhasha talaalka Johnson & Johnson haddii laga joogo muddo ka badan hal bil ay dhaaftay laga soo bilaabo markii aad qaadatay talaalka. Haddii laga joogo wax ka yar hal bil, iska fiiri calaamadahaan:

- Neefta oo kuyaraata
- Xabad xanuun
- Lugo barar
- Xanuunka caloosha/ubucda oo aan kaa ba'ayn
- Madax xanuun daran ama madax xanuun aan kaa ba'ayn
- Arag caad saaran yahay
- Nabar si fudud kaaga soo baxaaya ama finan dhiig leh oo yaryar oo ka muuqda maqaarka ka danbeeya meesha cirbada lagaaga muday.

Haddii aad qabto wax kamid ah astaamahaan kadib markaad qaadato talaalka, waa inaad raadsataa daryeel caafimaad isla markaaba. U sheeg dhakhtarka inaad dhawaan qaadatay talaalka Johnson & Johnson. Talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson wuxuu ka hortagaa in aad loogu xanuunsado cudurka COVID-19; hase yeeshee, dadka qaatay talaalka halka kuuro ah ee Johnson & Johnson ayaa wali u baahan inay wali sii adkeeyaan difaacooda ayna qaataan kuurada xoojinta ah labo bilood kadib kuurada koobaad. Midkood talaalka Pfizer ama Moderna ayaa lagu talinayaa inaad kuurada xoojinta ah ka dhigato.

Miyaan u baahanahay inaan qaato talaal kale?

Uma baahnid inaad dib u soo biloowdo talaalka adoo adeegsanaaya nooc kale oo talaalka ah haddii aad markii hore qaadatay talaalka Johnson & Johnson. Haddii aad horay u qaadatay kuurada xoojinta ah ee talaalka Johnson & Johnson, uma baahnid talaallo kale waqtigaan.

Wali ma qaadan karaa talaalka Johnson & Johnson haddii aan rabo?

Wali waad qaadan kartaa talaalka COVID-19 ee Johnson & Johnson haddii uu yahay talaalka aad rabto. Xasuusnoow in qof kasta uu qaadi karo dhiig xiranka dhifka ah kadib markuu qaato talaalka. Hase yeeshee, dhiig xiranka ayaa badanaa ku dhaca haweenka jira 30 ilaa 49 sano. Kala hadal talaal bixiyahaaga talaalka iyo khataraha ka dhalan kara.

Talaalka ayaa ah qaabka ugu fiican ee looga difaaco naftaada iyo dadka kale COVID-19. Haddii aadan qaadan talaal, la hadal dhakhtarkaaga ama goobta kuugu dhow si aad u qaadata talaalka.

[muusik qafiif ah]

Minnesota Department of Health
Communications Office
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
651-201-4989
health.communications@state.mn.us
www.health.state.mn.us

2/4/22 (Somali)

Si aad xogtaan ugu hesho qaabab kale, wac: 651-201-4989